Qofka dila Gaal Mucaahida ma urin doono Carafta Janada, Carafteedana waxaa laga uriyaa meel loo socdo afartan Sano

Cabdullahi Binu Camar Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey in Nabiga nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee uu yiri: "Qofka dila Gaal Mucaahida ma urin doono Carafta Janada, Carafteedana waxaa laga uriyaa meel loo socdo afartan Sano".
[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey goodiga adag ee ku soo arooray qofka dila Mucaahad waana Gaalka ku soogala Dhulka Muslimiinta heshiis iyo amaan, Qofkaasi ma urindoono Carafta Janada, Carafteedana waxaa laga uriyaa meel loo socdo afartan Sano.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/64637